Waa maxay qoorgooyuhu (meningitis)?

Waxaa lagaaga jawaabaya su'aalaha aad ka qabto cudurka qoorgooyaha iyo cudurka sumaysmiga dhiigga ee qoorgooyaha la xiriira (meningococcal septicaemia)

Cudurka qoorgooyaha iyo cudurka sumaysmiga dhiigga (septicaemia) ee qoorgooyaha la xiriira waa cudurro daran. Dhakhso ayay ku iman karaan laakiin waxay waxyeelladeedu qofka hayn kartaa noloshoo dhan.

Inkastoo horumar dhawaan laga gaaray tallaalladooda, haddana Ingiriiska sanad kaste qiyaas ahaan 3000 oo qof ayaa weli qaada qoorgooyaha baktiiriyeed (bacterial meningitis) iyo in kuwaas ka badan oo qaada qoorgooyaha fayruseed (viral meningitis). Cudurrada qoorgooyaha iyo sumaysmiga dhiigga ee qoorgooyaha la xiriira waxay yihiin kuwo laga argagaxo maxaa yeelay sida dhakhsada badan ee ay dadku ugu xanuunsadaan iyo dhibaatooyinka masiibada iyo burburka badan ee ka dib yimaadda.

Haddii aad warbixin dheeraad ah rabto, fadlan soo wac khadkayaga caawinta ee 24 saacadood maalintii furan ee ay kalkaaliyeyaal ka shaqeeyaan oo ah **0800 028 18 28**, khadka luqadda (language line) oo laga heli karo in ka badan 100 luqadood, ama booqo boggayaga internetka oo ah **www.meningitis-trust.org.**

Waa maxay qoorgooyuhu?

Qoorgooyuhu (meningitis) waa bararka xuubabka ku hareersan ee dhowra maskaxda iyo xangullaha (spinal cord).

Jeermisyada ugu badan ee cudurka qoorgooyaha keena waa fayrusyo iyo baktiiriyo.

Qoorgooyaha fayruseed dhif ayuu nolosha khatar u geliyaa, inkastoo dadku aad ugu xanuunsan karaan. Dadku intooda ugu badan si fiican ayay uga bogsadaan, laakiin qaarkood waxuu ku reebaa saamayn dambe sida daal, madax xanuun iyo xasuus la'aan. Qoorgooyaha fayruseed waxuu dadka ugu dhacaa si ka badan qoorgooyaha baktiiriyeed.

Qoorgooyaha baktiiriyeed nolosha ayuu khatar geliyaa waxuuna u baahan yahay in si degdeg ah loo daaweeyo. Dadka qaada qoorgooyaha baktiiriyeed intooda ugu badan way ka bogsan doonaan, laakiin qaar tiro badan ayuu ku reebi karaa saamayn baaxad weyn oo dambe oo 10kiiba mid ayaa ku dhiman doona.

Baktiiriyada qoorgooyaha la xiriirta (meningococcal bacteria) ayaa ugu badnaan keenta qoorgooyaha baktiiriyeed Ingiriiska gudihiisa. Baktiiriyadaasi waxay keeni kartaa qoorgooyaha iyo sumaysmiga dhiigga. Wadajir waxaa kuwaas loo yaqaannaa cudurka qoorgooyaha la xiriira (meningococcal disease). Marka dadku ay guud ahaan ka hadlayaan qoorgooyaha, waxay badi ula jeedaan cudurka qoorgooyaha la xiriira.

Cudurka qoorgooyaha iyo sumaysmiga dhiigga waxay saamayn karaan qof kaste da' kastoo uu yahay. Dhallaanka iyo carruurta yar yar ayaa halista ugu weyn ugu jira, laakiin dhowr iyo toban jirka iyo dhallinyarada kale (15 – 24 jir ah) ayay iyagana halistoodu weyn tahay.

Waa maxay calaamadaha iyo summaduhu?

Badi way adag tahay in la soo ogaado cudurrada qoorgooyaha iyo sumaysmiga dhiigga ee qoorgooyaha la xiriira. Marxaladaha ugu horreeya, calaamadaha iyo summaduhu waxay u eekaan karaan cudurrada kale ee ka caado badan sida hargabka. Summadaha ugu horreeya waxaa ka mid noqon kara xummad, madax xanuun, lallabo (matag ku qabta), matagid iyo daallanaan guud.

Calaamadaha iyo summadaha ugu badan waxay ku taxan yihiin dhinaca soo jeeda.

Si aad nuqul uga hesho kaarkayaga calaamadaha fadlan soo wac 0800 028 18 28.

Calaamadaha iyo summadaha caadiga u ah qoorgooyaha iyo sumaysmiga dhiigga

Dhallaanka iyo socodbaradka

Qoorgooyaha

- Xummad
- Diidista cuntada ama matagid
- Caloolxumo, diidista in la taabto
- Maqaarka oo cawlada barna yeesha
- Tabardarran, ficilcelin la'
- Hurdo badan, adag in la kiciyo
- Oohin caadi ahayn, taahid

Sumaysmiga dhiigga

- Xummad, gacmo iyo cago qabow
- Diidista cuntada ama matagid
- Maqaarka oo cawlada barna yeesha
- Dhibco ama firiiric, eeg 'Tijaabada bakeeriga' (glass test)
- Jilicsan, tabardarran, ficilcelin la'
- Neefsasho degdeg badan ama guuxid
- Hurdo badan, adag in la kiciyo

Carruurta iyo dadka waaweyn

Qoorgooyaha

- Xummad
- Madax xanuun daran
- Matagid
- Diidista iftiinka dhalaalaya
- Qoorta oo adkaata, murqaha oo xanuuna
- Hurdo badan, adag in la kiciyo
- Wareersanaan iyo xanaaq fudud

Sumaysmiga dhiigga

- Xummad, gacmo iyo cago qabow
- Matagid
- Xanuunka daran ee murqaha
- Dhibco ama firiiric, eeg 'Tijaabada bakeeriga'
- Calool xanuun iyo shuban
- Hurdo badan, adag in la kiciyo
- Wareersanaan iyo xanaaq fudud

Wixii khuseeyana firiirica?

- Firiirica libdhi waaya marka cadaadis la saaro (eeg 'Tijaabada bakeeriga') waxuu calaamad u yahay cudurka sumaysmiga dhiigga ee qoorgooyaha la xiriira. Waxuu firiiricu ku bilaabmi karaa xoogaa ah dhibco yar oo jirka meel uun ka soo baxa si degdeg ah ayuuna u fidi karaa isagoo u eekaada nabarro cusub.
- Dhibcaha ama firiirica waxaa keena dhiig ku daata xubnaha yaalla maqaarka hoostiisa.
- Dhibcaha ama firiiricu waxay u sii adag yihiin in laga arko dadka jirkooda ama maqaarkoodu madow yahay. Ka fiiri meelaha maqaarka ee cawlan iyo baalasha indhaha hoostood.

Firiirica sumaysmiga dhiigga (Septicaemic rash)

Tijaabada bakeeriga

Dhibcaha ama firiirica aanan libdhin marka cadaadis la saaro waxaa weli la arki doonaa marka dhinaca bakeeri cad aad loogu cadaadiyo jirka ama maqaarka.

Sawirka waxaa laga helay Dr Petter Brandtzaeg

Haddii la isku arko xummad iyo dhibco ama firiiric ku libdhi waaya cadaadis la saaro taasi waa xaalad u baahan daawayn degdeg ah.

Haddii uu qof xanuunsanayo ama ay caddahay in uu ka sii darayo, ha sugin in ay dhibco ama firiiric ka soo baxaan. Waxay soo bixi karaan goor dambe ama waxaa dhici karta in aanay soo bixinba.

Sidee ayay u fududdahay in la qaado qoorgooyaha?

Jeermisyada keena qoorgooyaha baktiiriyeed waxay caadi ahaan si aan waxyeello lahayn ugu nool yihiin gadaasha cunaha. Waxaynu ugu badnaan iyaga sidnaa mar uun nolosheena annagoon ku xanuunsan, waxayna naga caawiyaan in aynu dhisanno difaaca dabiiciga ah ee jirka (naga difaaca cudurka).

Jeermisyada waxay dadku isugu tebiyaan qufaca, hindhisada iyo dhunkashada afka, laakiin dhif ayay cudur u keeni doonaan.

Inta ugu badan iskii ayuu cudurku dadka ugu dhacaa, laakiin marka uu cudurka qoorgooyaha la xiriira qof hayo, waxaa yara suurogal ah in ay dad kale qaadaan.

Marka uu cudurka qoorgooyaha la xiriira qof hayo, kooxda caafimaadka dadweynaha ee xaafadda ayaa antibiyootig siin karta dadka muddo badan aad ugu dhowaa qofkaas xanuunsanaya. Taasi waa si dadka kale halista looga yareeyo.

Ka hortagga qoorgooyaha

Tallaalidda ayaa ah habka keliya ee looga hortagi karo cudurka qoorgooyaha. Waxaa la heli karaa tallaallo waxtar leh oo ka hortaga noocyo ka mid ah qoorgooyaha baktiiriyeed waxaanay kuwaasi gargaar ka bixiyeen sidii Ingiriiska looga yarayn lahaa dadka cudurkaas qaada.

Sida qayb ka ah barnaamijka tallaalidda caadiga ah ee carruurta waxaa dhallaanka iyo carruurta yar yar dhammaantood loogu deeqaa tallaallo ka hortaga baktiiriyada kooxda C ee qoorgooyaha la xiriirta (meningococcal group C), Hib iyo bakteeriyada oofwareenka (pneumococcal bacteria).

Hadda ma jiro tallaal ka hortaga cudurka ay keento baktiiriyada kooxda B ee qoorgooya la xiriirta (meningococcal group B); sababta ugu badnaan cudurka qoorgooyaha ee baktiiriyeed ee Ingiriiska.

Cudurka qoorgooyaha ka dib

Saamaynta dambe ee daran welibana awoodda yaraysa si fiican ayaa loo yaqaannaa waxaana ka mid ah dhego beelid, indho beelid, dhibaatooyinka waxbarashada iyo dhibaatooyinka akhlaaqda.

Ka dib sumaysmiga dhiigga ee qoorgooyaha la xiriira, dadka qaarkood waxaa ku hadhi kara calaamado daran ee nabar, waxyeello gaarta unugyada muhiimka ah ee jirka, ama addin beelid.

Qofwalboo uu ku dhacay cudurka qoorgooyaha, qoyskooda iyo dadka hareera jooga, ayay saamayni gaari doontaa badina noloshooda ayaa abidkeed isbeddeli doonta.

Si aad u hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan saamaynta dambe fadlan la xiriir khadka caawinta ee 24 saacadood maalintii furan ee ay kalkaaliyeyaashu ka shaqeeyaan telefoonkiisuna bilaash yahay oo ah **0800 028 18 28**.

Waxa aad samaynayso haddii aad ka shakido cudurka qoorgooyaha ama sumaysmiga dhiigga

- **Islamarkaaba la xiriir Takhtarkaaga Guud (GP). Haddii uusan Takhtarkaaga Guud furnayn, toos u tag waaxda gargaarka degdegga ah ee kuugu dhow.**
- **Si taxaddar leh u qeex calaamadaha sheegna in aad u aragto in ay noqon karto cudurka qoorgooyaha ama sumaysmiga dhiigga.**
- **Way adkaan kartaa in hore loo soo ogaado cudurka. Haddii aad takhtar aragtay aanad weli walwal qabto, ha ka cabsan in aad gargaar caafimaadeed mar labaad codsato.**

Ururka Cudurka qoorgooyaha (Meningitis Trust)

Annaga oo ah Ururka Cudurka qoorgooyaha (Meningitis Trust) waxaannu nahay hay'ad samafal ah oo diiwaansan taasoo 1986kii ay aasaaseen qoysas uu saameeyey cudurka qoorgooyuhu. Waxaannu u huran nahay in aannu kordhisanno fahanka cudurka iyo in adeegyo xirfadeed oo takhasus leh aannu siinno cid kastoo waxyeello ay gaartay. Waxay adeegyadaasi ku deeqaan taageero shucuureed, camali ah iyo maaliyadeed si dadka looga caawiyo in ay noloshooda dib u dhistaan. Siyaabahan oo kale ayaannu taas u samaynaa.

Khadka caawinta ee 24 saacadood maalintii furan ee ay kalkaaliyeyaashu ka shaqeeyaan – adeeg Telefoon bilaash ah, oo ku deeqa warbixin iyo taageero toddoba maalmood asbuucii

Caqlicelin xirfadeed – caqlicelin sir ah oo loogu talagalay dadka uu qoorgooyuhu ku dhacay iyo qoysaskooda

Deeqo taageero maaliyadeed – si gargaar looga bixiyo maalgelinta tababbar takhasus leh, qalab, waxqabadyo, daryeelka nasinta ah (si daryeeleyaasha looga nasiyo daryeelka) iyo kharashyada aaska

Booqashooyinka guriga – shaqaale tababbaran ayaa warbixin iyo taageero dadka ugu deeqa guryahooda dhexdooda

Xiriirrada tooska ah – dadka uu saameeyey cudurka qoorgooyuhu oo toos loola xiriiriyo mutaddawiciin iyaguba soo maray cudurka

Waxay taasi ku suurtogashay uun tabarrucyada dadka kula siman, maadaama aannu ku dhawaad gebi ahaan isku tiirinno taageerada samafalka ah si aannu hawlahayaga u maalgelinno.

Freephone

Khadka caawinta ee 24 saacadood maalintii furan ee ay kalkaaliyeyaashu ka shaqeeyaan

0800 028 18 28

www.meningitis-trust.org

The Meningitis Trust
Fern House, Bath Road
Stroud, Glos, GL5 3TJ, UK
Telefoonka: 01453 768000
Fakiska: 01453 768001

The Meningitis Trust

Lambarka diiwaangelinta hay'adda samafalka ah 803016 (England iyo Wales) SC037790 (Scotland) ©Meningitis Trust 2008